

Heerka Daryeelka Macaamiisha

You can ask for this leaflet in large print, on audio tape or in another language. Please contact us on 020 8709 4300.

আপনি এই লিফলেটটি বড় ছাপায়, অডিও টেপে বা অন্য যে কোন ভাষায় পেতে পারেন। দয়া করে আমাদের সাথে যোগাযোগ করুন ০২০ ৮৭০৯ ৪৩০০ নম্বরে। [Bengali]

Waxaad dalban kartaa warqaddan oo ku daabacan farta waawayn, iyadoo ku duuban cod ama ku tarjuman luqadaha beesha. Fadlan nagala soo xidhiidh telefoonka ah 020 8709 4300. [Somali]

Możesz poprosić o tę ulotkę drukowaną dużą czcionką, w postaci zapisu audio lub w innym z języków społeczności. Skontaktuj się z nami pod numerem telefonu 020 8709 4300. [Polish]

Quý vị có thể xin tờ rơi (tờ thông tin) này bằng chữ lớn, bằng ghi âm hoặc tiếng nói khác trong cộng đồng. Xin vui lòng liên lạc với chúng tôi, điện thoại số 020 8709 4300. [Vietnamese]

你可要求這份單張的大字印刷本、錄音或其他社區語言的版本，請致電 020 8709 4300 與我們聯絡。 [Chinese]

آپ یہ کتابچہ بڑے حروف، آڈیو یا کسی دوسری کمیونٹی زبان میں طلب کر سکتے ہیں۔ براہ مہربانی ہم سے فون نمبر 020 8709 4300 پر رابطہ کریں۔ [Urdu]



Awarded for excellence



INVESTOR IN PEOPLE



North River Alliance

Gateway Housing Association

409-413 Mile End Road, London, E3 4PB

Residents: 020 8709 4300

General enquiries: 020 8909 4409

Fax: 020 8709 4400

Email: enquiries@gatewayhousing.org.uk

www.gatewayhousing.org.uk

Waraaqdani waxay ku siinaysaa macluumaad ku saabsan adeegyada aanu ku siin doono. Waraaqdani ma saamayn doonto xuquuqahaaga lagu sharxay heshiiskaaga deganaanshaha. Aad ayay u mahadsanyihiin dhammaan dadka deggan ee gacanta ka geystey soo saaritaanka waraaqdan.

Customer Care Standard

– Somali translation

gateway
housing association

Markaad nala soo xidhiidho, waxaad filii kartaa adeegga soo socda.

Haddaad nala soo hadasho waxaanu:

- telifoonka kaga jawaabno markuu dhaco shan illaa iyo 10 jeer;
- kuu sheegi doonaa qofka kula hadlaya;
- ahaan doonaa qaar akhlaaq leh (adigana sidoo kale ayaanu kaa filaynaa inaad noola dhaqanto si akhlaaq leh);
- telifoonka ka jawaabi doonaa inta u dhaxaysa 8da subaxnimo illaa iyo 6da fiidnimo, Isniin illaa iyo Jimce;
- wax kaga qaban doonaa su'aalahaaga isla markiiba, haddii aanu kari karno;
- kuu gudbin doonaa qof ku caawin kara, haddii qofka ugu horreeya ee aad la hadashaa aanu awoodi Karin inuu wax ka qabto su'aalahaaga (haddii aanu joogin qof ku caawiyaa, waxaanu kuu qabanqaabin doonaa inuu qof kugu soo celiyo telifoonka hal maalin gudaheed); iyo
- baadhi doonaa farriimaha codka ah ee naloo duubo telifoon ayaanuna kugu soo celin doonaa hal maalin gudaheed haddii aad farriin noo dhaaftay.

Haddii aad waraaq noo soo qorto ama aad email noo soo dirto, waxaanu:

- kuugu soo sheegi doonaa, laba maalmood gudahood inaanu helnay;
- jawaaab buuxda kuugu soo diri doonaa 10 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood (haddii aanu u baahano inaanu arrinta sii eegno, waxaanu waraaq kuugu soo diri doonaa siddeed maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda anagoo kuu sharxayna sababta iyo goorta aad heli doonto jawaab buuxda);
- wax kuugu soo qori doonaa af Ingiriisi cad;
- kuu qabanqaabin doonaa turjumaad haddii aad u baahato;
- jawaabta si cad ugu soo daabici doonaa magaca iyo telifoonka xidhiidhka ee qofka wax ka qabanaya su'aalahaaga; iyo
- kugu soo booqan doonaa guriga muddo 10 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood haddii aad naga codsato.

Markaad xaffiiska soo booqato, waxaanu:

- siin doonaa qof kastaba gelitaan ku habboon;
- furnaan doonaa inta u dhaxaysa 9ka subaxnimo illaa 5ta galabnimo, Isniin illaa Jimce;
- hubaal ka dhigi doonaa in aagayaga qaabilaaduyahay nadiif;
- ahaan doonaa qaar akhlaaq leh oo ku caawiya kuulana dhaqma si ixtirmaal leh;
- hubaal ka dhigi doonaa inay dhammaan shaqaalahayagu xidhaan kaadhka aqoonsiga oo magacooda iyo sawirkoodu ku yaallo;
- kuu hayn doonaa qol gaar ah oo aad nagula hadasho;
- ku salaami doonaa markaad timaado, ama shan daqiiqo gudahood haddii kooxdayada adeegga macaamiishu mashquul yihiin; iyo
- kuu qabanqaabin doonaa in xubin shaqaalaha ka mid ahi kugu arko 10 daqiiqadood gudahood haddii aanad ballan lahayn.

Markaanu gurigaaga kugu soo booqano, waxaanu:

- had iyo goor xidhnaan doonaa kaadhahd aqoonsi;
- iman doonaa waqti munaasib ah oo maalintii ah (9ka subaxnimo illaa 5ta galabnimo), anagoo ballan gaar ah kuu qabanay mooyee;
- kuu sii digi doonaa haddaanaan ballantaada oofin Karin, waxaanaanu kuu qaban doonaa waqti munaasib kugu ah sida ugu dhakhsaha badan ee caqligalka ah;
- ku siin doonaa fursad aad ku aragto xubin shaqaalaha ka mid ah oo aad isku sinji tihiin, haddii aad codsato;
- had iyo goor qoraal ahaan ku xaqiijin doonaa wixii heshiisyo ah ama qabanqaabooyin ah ee aanu kula galno;
- markasta ahaano qaar akhlaaq leh oo ku ixtiraama; iyo
- xasaasi ku ahaano hab nololeedyada kala duwan ee dhammaan dadka guryahayaga deggan.

Beelo kala duwan – aragti keliya

Waa muhiim inaad noo soo sheegto haddii ay tafaasiishaada xidhiidhku isbedelaan.